Hawlgalka Kaalmaynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOM)

Warbixin uu Golaha Ammaanka u jeediyey Danjire Nicholas Kay, Ergayga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobey u qaabilsan Soomaaliya (SRSG)

11 Maarso 2014

[Sida loo jeediyey]

Marwo Madaxwayne,

Xubnaha Golaha, Waad ku mahadsan tahay inaad fursad ii siisay inaan Golaha maanta uga warbixiyo Muqdisho iyo taageerada joogtada ah ee aad la garab taagan tihiin dhismaha nabadda iyo dowlad-dhisidda Soomaaliya. Waxaan ku sugan ahay magaalada Muqdisho mana idinla joogo New York, taas oo ay ugu wacan tahay xowliga dhacdooyinka oo haatan aad u xooggan.

Waxaan rajaynayaa inaad fahmaysaan.

Marwo Madaxwayne,

Rajada ugu wanaagsan ee nabad iyo xasillooni ka dhalata Soomaaliya, Geeska Afrika iyo meelo ka baxsan ayaa weli ah Soomaaliya oo midaysan, amni iyo federaalna ah. Tani waa mid la gaari karo. Soomaaliya waxay gaari kartaa hadafkeeda ah dastuur lagu heshiiyo, hannaan doorasho oo dalka oo dhan ka dhacda iyo in la kordhiyo amniga sanadka 2016. Laakiin waqtigu waa adag yahay, waxaana laga yaabaa in muddada gaabani ay sii adkaato. Ammaan darrada ka jirta Muqdisho ayaa sidoo kale caqabad ku ah Soomaalida, QM iyo beesha caalamka.

2014 waa sanad muhiim ah. Waxaan dhihi lahaa, waxaa jira caqabado amni iyo kuwo siyaasadeed, kuwaas oo laga gudbi doono haddii Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya iyo saaxiibada caalamku ay sii midaysnaadaan oo ay labaduba soo dedejiyaan fulinta ballan-qaadyadii labada dhinac.

Marwo Madaxwayne hadda oo aan hadlayo, AMISOM oo la ballaariyay iyo Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed (SNA) ayaa qaadaya weerarro lasoo cusboonaysiiyey oo ka dhan ah Al Shabaab, kaasoo uu suurtageliyey Qaraarkii Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobey ee tirsigiisu ahaa 2124. Wuxuu noqonayaa horumarkii ugu muhiimsanaa uguna baaxadda waynaa dhul ahaan tan iyo markii ay AMISOM bilaabatay. waxaana horraanba jira guulo la taaban karo.

Waxaan bogaadinayaa dadaalka iyo naf-hurnimada ay sameeyeen AMISOM iyo Booliiskeeda iyo dalalka ay ciidamadu ka joogaan Soomaaliya. Inta uu hoggaaminayo Danjire Annadif, AMISOM waxa ay sii ahaanaysaa midda keliya ee ugu muhiimsan ee gacan ka gaysata amniga Soomaaliya, iyo saaxiib muhim u ah Dowladda Federaalka iyo Qaramada Midoobey xagga dhismaha nabadda.

Dowlad-dhisidda iyo xasilinta. Ciidamada Itoobiya ayaa iyagana horraantii sanadkan si rasmi ah loogu daray howlgalka AMISOM.

QM ayaa iyadna kaalinteeda ka qaadatay u diyaar garowga howlgallada cusub. Sahayda raashinka, shidaalka iyo biyaha ayaa waxaa diyaariyey Xafiiska QM ee Taageerada AMISOM (UNSOA) qaybihiisa kala duwan kahor inta aan la gaarin howlgallada. UNSOA iyo UNSOM ayaa gacan ka gaystey tababarka Ciidamada Xoogga Dalka Soomaaliyeed. Tan waxaa ka mid ah tababbarka xuquuqda aadanaha iyo sharciga bini'aadminnimada, si waafaqsan siyaasadda ku dadaalista Xuquuqda Aadanaha ee Xoghayaha Guud.

Sida aad la socon doontaan, magaalada Muqdisho xaaladda ammaan ayaa faraha kasii baxaysey tan iyo markii ugu dambaysey ee aan warbixin siiyey Golaha bishii Diseembar. Weerar ismiidaamin ah oo lagu qaaday kolonyo ka tirsan Qaramada Midoobey, weerar ismiidaamin ah oo ka dhacay xarunta Madaxtooyada ee Villa Somalia, iyo weerar kale oo ismiidaamin ah oo ka dhacay agagaarka xarunta Nabadsugidda Qaranka, dhammaan bishii Febraayo, ayaa ahayd mid xasuusasho mudan. Khatarta weeraro kale oo dheeraad ah oo ka dhan ah Dowladda Soomaaliya iyo bartilmaameedyada caalamiga ah ayaa weli ah mid aad u sarreeya.

Ciidamada Dowladda Federaalka iyo kuwa AMISOM ayaa kordhiyey howlgallada lagu xaqiijinayo amniga magaalada, waxaana Dowladdu ay dejisay qorshe cusub oo lagu sugayo ammaanka Muqdisho. Waxaan dhararayaa in hore loo hirgeliyo waxaana rajaynayaa in saaxiibada caalamku ay si firfircoon u taageeri doonaan oo ay si degdeg ah uga soo jawaabi doonaan codsiyada Dowladda.

Qaramada Midoobey waxay iyaduna qaaday tallaabooyin ay ku hagaajinayso ammaankeeda. Qorshaynta Qaybta Ilaalada Qaramada Midoobey, oo uu Goluhu ansixiyay bishii Febraayo si loo ilaaliyo shaqaalaha iyo xarumaha Qaramada Midoobey ee Muqdisho, ayaa socota, iyada oo la filayo in ciidamada ugu horreeya lasoo diro bisha Abriil. Waxaan fursaddan uga faa'iidaysanayaa inaan uga mahadceliyo Golaha iyo Dowladda Uganda taageeradooda
sameynta Unugta Ilaalada. Waxaan sidoo kale jeclaan lahaa in aan uga mahadceliyo AMISOM sida ay isaga kaashadeen fududaynta daabuliddooda.

Marwo Madaxwayne,

In kasta oo ay muhim yihiin, haddana howlgallada ciidanku kaliya ma keenayaan dhismo nabadeed iyo dowlad-dhisid waarta. Dowladdu waxay dejisey hannaan lagu xasilin doono goobaha noqon doona kuwo la gaari karo natiijada howlgalladaas dartood, kuwaas oo ay ka mid yihiin in la sameeyo maamullo ku meel gaar ah. UNSOM waxay si dhow ula shaqaynaysey saaxiibbadeeda si ay u taageeraan arrintan.

Marka ay AMISOM iyo Ciidanka Qaranka Soomaaliyeed bilaabaan weerarkooda, waxaan dhammaanteen dareensan nahay baahida loo qabo in la ilaaliyo mabaadi'da bani'aadminnimada iyo ixtiraamka sharciga caalamiga ah ee bani'aadminnimada. Waxaan sidoo kale u baahanahay tas-hiilaad. Waxaan u soo jeedinayaa deeq bixiyayaasha iyo saaxiibbada ay wada shaqaynta leeyihiin in ay ka qaybqaataan sanduuqa ammaanada ee sahayda taageerada hub aan halis ahayn oo la siiyo Ciidanka Qaranka Soomaaliyeed taasoo waafaqsan qaraarka tirsigiisu yahay 2124.

Taageerada noocan oo kale ah ee Qaramada Midoobey u fidiso ciidanka qaranka waa mid horseed ah, waxayna u baahan tahay dadaal iyo go'aan wadajir ah si aan u guuleysanno.

In la horumariyo ciidammo ammaan oo xoog iyo xirfad leh oo Soomaaliyeed waa lama huraan. Horumar baa la samaynayaa, laakiin waxa sii adkaynaya nabadgelyo xumada iyo colaadaha sii socda. Shaqada UNSOM ee ku saabsan dib u habaynta waaxda amniga ayaase sii socota. Waxaanu tusaale ahaan qaadaynaa tillaabooyin wax ku ool ah sida taageeridda diiwaan-gelinta biometric-ga ah iyo bixinta lebiska ama tuutaha. Waxaan qorshaynaynaa inaan taageerno qoritaanka 2,300 oo askari oo dheeri ah oo ka tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed sanadka 2014-ka. Hay'adaha amniga Soomaaliya waxay u baahan yihiin in si degdeg ah oo qaab leh loo maalgeliyo.

Waxaan rajaynayaa in saaxiibada caalamiga ihi ay la shaqayn doonaan UNSOM, AMISOM iyo Dowladda Federaalka si ay uga shaqeeyaan sidii arrintan loogu qaban lahaa waqtiga ku habboon uguna wax ku oolsan.
Waxaan sidoo kale ku faraxsan ahay in aan sheego in bishii Febraayo howlgalka tababarka Midowga Yurub uu barnaamijyadiisa tababar ka bilaabay gudaha Soomaaliya. Tani waa tallaabo muhiim ah oo mudan in la aqoonsado.

Marwo Madaxwayne,

In la gaaro amni ballaaran waa howl muhim ah sanadka 2014. Laakiin cabbirka siyaasadeed ee dowlad-dhisidda iyo nabad-dhisidda ayaa si isku mid ah muhiim ugu ah sannadkan. Muddo ku dhow saddex bilood oo wadahadal ah, Soomaaliya ayaa hadda yeelatay dowlad cusub oo Federaal ah oo uu hoggaaminayo Ra'iisul Wasaare Cabdiweli Sheekh Axmed. Golaha Wasiirrada ayaa ka kooban rag leh khibrad iyo Wasiirro farsamo yaqaanno ah oo qorshayaashooda shaqo lagu dhisay waxyaabaha mudnaanta leh ee lagu tilmaamay Heshiiska Higsiga Cusub.

24-kii Febraayo, aniga iyo Madaxwayne Xasan Sheekh Maxamuud, waxaan si wadajir ah u shir guddoominey, magaalada Muqdisho, shirkii ugu horreeyey ee Madasha Iskaashiga Heerka Sare, oo ah hay'adda kor-joogtada ka ah hirgelinta Heshiiska. Madashu waxay ku soo gabagabaysey in hadda la joogo waqtigii ay Xukuumadda iyo saaxiibada caalamkuba ay qorshayaasha u beddeli lahaayeen ficil iyo waxqabad, ballan-qaadyada mashaariic la taaban karo iyo in la sameeyo horumar siyaasadeed oo dhab ah. Waxaan ku faraxsan ahay in aan tan ka warbixiyo inta aan kulansan nahay, Dowladda Federaalka ayaa soo gebagebeyneysa qorshe iyo jadwal tifaftiran oo ku aaddan geeddi-socodka lagu dhisayo Maamullada Federaalka ah, Dastuur dhamaystiran iyo Dimuqraadiyaynta sanadka 2016-ka.

Waxaan filayaa in jadwalkan, oo loo yaqaan si ballaaran Vision 2016, uu yeelan doono waxqabadyo la taaban karo oo maangal ah, kuwaas oo la daabici doono toddobaadyada soo socda kaddib wadatashiyo dheeraad ah oo lala yeesho dhinacyada ay khusayso, oo ay ku jiraan Puntland iyo maamulka KMG ah ee Jubba. QM waxay diyaar u tahay inay kaalin dhexe ka qaadato taageeridda hirgelinteeda.

Xoojinta maamulka maaliyadda dowladda waa tiir kale oo dowlad-dhisidda ka mid ah. Kaddib markii uu is casilay Gudoomiyihii hore ee Bangiga Dhexe bishii Nofeembar 2013, Dowladdu waxa ay horumar ka sameysay dib u dhiska kalsoonida qaranka iyo tan caalamiga ah ee lagu qabo

hay'adaha maaliyadeed. Tillaabada muhiimka ah ayaa ahayd in la sameeyo Guddiga Maamulka Maaliyadda, kaasoo ay ka qaybqaadanayaan khubaro ka tirsan Dowladda iyo hay'adaha caalamiga ah ee maaliyadda si ay ugala taliyaan maamulka maaliyadda.

Tillaabooyinka kale ee muhimka ah waxaa barbar socda, in Dowladda Federaalku ay ogolaatay inay la wadaagto qandaraasyada istiraatijiyadeed ee jira guddiga si loo sameeyo dib u eegis farsamo iyo la-talinta khibradeed. Daah-furnaanta iyo isla xisaabtanka oo la hagaajiyey ayaa ah tillaabooyin muhim ah oo lagu bilaabayo socodka gargaarka. Baanka Adduunka, waa in aan xuso, in uu ka yara caga jiidayey in uu gacan ka gaysto horumarka aan hadda bilaabayno inaan aragno.

Marwo Madaxwayne,

Waxaa loo baahan yahay in la dardargeliyo dhismaha Maamul-goboleedyada Federaalka. Sidaas oo kale ayaan ku sheegay warbixintii aan idiin soo bandhigay bishii Diseembar. Maanta waa ka sii xaqiiqo badan tahay. Magaalada Baydhabo, ee Koonfur Galbeed Soomaaliya, waxa uu weli farqi ballaarani u dhexeeyaa laba dhinac oo iska soo horjeeda, oo u kala ololeynaya maamul-goboleedyo lix iyo saddex gobol ka kala kooban. 3-dii Maarso, waxaan ugu baaqay dhammaan dhinacyada inay ixtiraamaan Dastuurka iyo heshiisyada jira ee Dowladda Federaalka, khilaafaadka jirana lagu xalliyo wadahadal loo dhan yahay. Waxaan sii wadayaa bixinta xafiisyada wanaagsan ee UNSOM si ay u taageeraan hannaan ay Dowladda Federaalku hoggaamiso.

Xukuumadu waxay si cad u sheegtay inay ka go'an tahay taageeridda maamul-goboleed saddex gobol ah, mowqifkaas oo ay tahay in la ixtiraamo. Koonfurta Soomaaliya waxaa ka socday dhismaha maamulka KMG ah ee Jubba iyadoo 20-kii bishan lagu dhawaaqay xilal wasiirnimo. Waxaa la qaaday tillaabooyin wanaagsan oo loo qaaday dhanka dib-u-heshiisiinta iyo ka qaybgalka. Laakiin si buuxda u dhaqan gelinta heshiiskii 28-kii Agoosto ee Addis Ababa wuxuu u baahan yahay ka qaybgal iyo tanaasul joogto ah. Waxaan salaamayaa dadaalka Itoobiya oo ah Guddoomiyaha Golaha Wasiirrada IGAD iyo dammaanad qaadka heshiiskii ee isla Addis Ababa.

UNSOM waxa ay la shaqaynaysaa Dowladda Faderaalka, Maamulka KMG ah ee Jubba iyo saaxiibbadeeda si ay u abaabulaan agabkii lagu maareeyn lahaa tirada sii kordhaysa ee dagaal-yahannada soo goostay ee Kismaayo jooga iyo in la sii ambaqaado dadaallada dib-u-heshiisiinta.

Dhanka Woqooyi, Puntland, 8-dii Janaayo, waxaan goobjoog ka ahaa, oo ay wehliyaan xubno badan oo beesha caalamka ka tirsan, doorashadii Madaxwayne Cabdiweli Maxamed Cali Gaas iyo xil-wareejintii nabdoon ee uu ku dhaqaaqay Madaxwaynihii hore ee Cabduraxmaan Maxamed Faroole. UNSOM waxa ay taageertay dadaallada dhexdhexaadinta ee muhimka ahaa ee ku aaddanaa doorashooyinka waxaana ay u ololaysay, waxyaabo kale oo ay ka mid yihiin, ka qaybqaadasho intii hore ka ballaaran oo siyaasadda laga siiyo haweenka.

Waxaan dhiirigelinayaa sida ay Dowladda cusub uga go'an tahay in ay dib u soo celiso geeddi-socodkii Dimoqraadiyaynta Puntland ee hakadka galay iyo soo celinta xiriirka Dowladda Federaalka Soomaaliya. Madaxwayne Gaas ayaa carrabka ku dhuftay in ay adag tahay xaalada miisaaniyadda iyo dakhli-yarida keenaysa in la bixin waayo mushaaraadka madaxda Maamulka Puntland oo ay ku jiraan ciidamada ammaanka.

Waxaan rajaynayaa in dadaalka deeq-bixiyeyaasha ee lagu raadinayo xal ku-meel-gaar ihi uu miro dhali doono. Waxaan sidoo kale dhiirrigelinayaa firfircoonida iyo xamaasadda u ololaynta haweenka Soomaaliyeed ee siyaasadda. 23 urur haween oo ka kala socda Koonfurta-Bartamaha Soomaaliya iyo Puntland ayaa hirgeliyey Hindisaha Hoggaaminta Haweenka Soomaaliyeed si ay ugu ololeeyaan kordhinta ka qaybgalka haweenka ee siyaasadda.

UNSOM waxa ay weli si adag uga go'an tahay inay sare u qaaddo ka qaybgalka haweenka ee go'aan gaarista qaranka. Si dhiirigelin leh dhanka Puntland, Madaxwayne Cabdiweli Gaas ayaa Golaha Wasiirada u magacaabay shan haween ah, kuwaas oo ka badan kuwii hore.

Marwo Madaxwayne,

Horumarinta iyo ixtiraamka xuquuqul insaanka waa udub dhexaadka taageerada UNSOM ee Dowladda Federaalka. Waxaan kala shaqaynayney labadaba AMISOM iyo Ciidanka Qaranka Soomaaliyeed si aan u bixinno tababarro la xiriira xuquuqul insaanka, sharciga caalamiga ah ee bini'aadminnimada iyo sharciga qaxootiga. Koox wada Shaqayn Wadajir ah leh oo dhanka Xuquuqda Aadanaha ah, kuwaas oo ay ku jiraan AMISOM, UNSOA iyo UNSOM ayaa la dhisay. Waxaan rajaynayaa in mustaqbalka dhow sidoo kale lagu soo dari doono Dowladda Federaalka.

Hannaanka wadatashiga ee lagu abuurayo Guddiga Xuquuqul Insaanka Qaranka ayuu dib u dhac kale ku yimid iyadoo loo eegayo weerarrada joogtada ah ee ka dhanka ah difaacayaasha xuquuqda aadanaha iyo suxufiyiinta iyo sii socoshada ku dhaqanka ciqaabta dilka ah. Waxaan sidoo kale aad uga walaacsan ahay xadgudubyada galmada ee ka socda Soomaaliya.

Waxaan rajaynayaa hirgelinta talooyinka Kooxda Khubarada ee Xadgudubyada Galmada ee lagu dhisay Qaraarkii Golaha ee uu tirsigiisu ahaa 1888 (2009). Kooxda Khubarada ayaa Soomaaliya booqday Diseembar 2013-kii.

Marwo Madaxwayne,

In kasta oo ay jiraan dhibaatooyin bini'aadminnimo oo waawayn oo adduunka iyo gobolka ka jira, misna waxaan aaminsan ahay in Soomaaliya ay mudnaanta koowaad sii lahaato. Dhibaatada bini'aadminnimo ee waddanku waa midda ugu wayn uguna qallafsan adduunka. Qiyaastii 2.9 milyan oo qof ayaa u baahan doona taageero naf-badbaadin ah oo deg deg ah lixda bilood ee soo aaddan. Horumarkii dhowaa ee xaaladda bini'aadminnimo waa mid jilicsan oo ay khatartu dib u soo noqon karto haddii isbeddellada hadda jira ee maalgelinta hooseeya misna gaabiska ah ee codsiga bini'aadminnimo ee 2014 ay sii socdaan.

Dhowaan ayaa waxaa sidoo kale soo baxayey warar sheegaya in uu jiro barakac ka dhashay dagaalka, gaar ahaan Baay iyo Bakool. Laga soo bilaabo 9-kii bishii Maarso ilaa 3,700 oo qof oo barakacayaal cusub ah ayaa gaarey Baydhabo, taasoo ay ugu wacnayd cabsi laga qabo weerarro. Laga bilaabo maanta waxay dhamaantood bilaabeen helitaanka hoy iyo agab-guri. Sidoo kale waxaa la sheegay in ilaa 700 oo qoys oo horay usoo barakacay ay dib ugu laabteen Degmada Xudur kaddib markii ay dib u qabsadeen Ciidamada Xoogga Soomaaliya iyo kuwa AMISOM. Galaangalka bini'aadminnimada ee halkaas ayay caqabad wayni ka joogtaa xaaladda ammaan ee kacsan awgeed.

Jaalalka bani'aadminnimada ayaa ka shaqaynaya sidii ay u go'aamin lahaayeen baahiyaha deg degga ah iyo sida ugu wanaagsan ee looga jawaabi karo. 10-kii bishii Diseembar ee sanadkii hore waxaa heshiis saddex geesood ah kala saxiixday dowladaha Kenya, Soomaaliya iyo UNHCR, kaas oo ku saabsan in si iskood ah dib loogu celiyo qaxootiga Soomaaliyeed ee ku sugan dalka Kenya. Laakiin xaaladaha Soomaaliya ayaan weli ku habboonayn soo noqoshada qaxooti ballaaran.

Haddii aan la helin diyaargarow ku filan, soo noqoshada tirada badani waxay dhab ahaantii sababi kartaa xasillooni darro waxayna ka sii dari kartaa xaaladda bini'aadminnimo ee dalka. Isbeddel lagu sameeyey sharcigeeda dartii, bishii Diseembar 2013-kii, Boqortooyada Sacuudi Carabiya waxay bilowday inay tarxiisho muwaadiniinta Soomaaliyeed iyo sidoo kale shaqaalaha kale ee muhaajiriinta ah. Waxaa lagu qiyaasaa in in ka badan 22,000 ay ku noqdeen Soomaaliya ilaa hadda.

Ururka Caalamiga ah ee Socdaalka ayaa rajaynaya in ilaa 33,000 oo qof oo dheeraad ah in la tarxiili karo saddexda bilood ee soo socda. Qulqulka noocan oo kale ah ee gelaya magaalada Muqdisho ayaa sii kordhin kara dhibaatada haysata dadka ku barakacay caasimadda.

Marwo Madaxwayne,

Horumarka Soomaaliya ilaa hadda wuu isku dhafan yahay, laakiin waa horumar. Waxaa noo harsan waddo dheer. Bartilmaameedyada ay Dowladda Faderaalka lafteedu dejisey, iyada oo la kaashanaysa beesha caalamka, ayaa ah kuwo xaaladda khuseeysa oo suurtogal ah.

Dib-u-heshiisiinta Qaranka, Federaalaynta, dhammaynta geeddi-socodka Dastuurka iyo dib-u-dhiska hay'adaha amniga ayaa muhiim ah. In kasta oo ay caqabado iyo dib u dhacyo ay jiraan, haddana midna howlahaasi kama baxsana kuwo aannu si wadareed u wada gaari karno. Laakiin waqtigu waa muhim. Waqtigii ficilku waa hadda

Marwo Madaxwayne,

Gebagebadii, Soomaaliya iyo Soomaalidu waxay si ba'an ugu baahan yihiin ammaan la hagaajiyey. Waxaan si adag u aaminsan ahay in tan la gaari karo, laakiin waxay u baahan tahay dadaal wadajir ah. Marka labaad, dib-u-heshiisiin heer qaran ah waa in si deg deg ah loo raadiyaa. Dhisidda Maamullada Federaalka ayaa muhiim u ah abuurista haykal federaal ah oo midaysan oo wax ku ool ah oo ay Soomaaliya yeelato. Dadaallada dib-u-heshiisiintu waa inay sii socdaan, waxayna noqon doonaan agab dheeraad ah oo lagula dagaallamo cadowga nabadda.

Waa in la sameeyaa sharci dejinta hab-raacyada dastuuriga ah iyo doorashada. Ugu dambeyntii, waxaan ku boorrinayaa beesha caalamka inay sii wadaan taageerada lagama maarmaanka ah si loo dhiso awoodda Dowladda Federaalka si ay u qabato shaqada muhiimka ah ee harsan. Soomaalidu waxay u baahan yihiin inay arkaan oo ay dareemaan faa'iidada ay leedahay kordhinta nabadda iyo amniga.

Waxa loo baahan yahay in qorshayaasha wanaagsan loo beddelo gargaar la taaban karo, ama sida ay Soomaalidu ku maahmaahdo "Gacan macaan baa af macaan ka roon". Dowladda Federaalka

ayaa ka niyad jabsan sida gaabiska ah ee gargaarka la taaban karo loo keenayo. Dal ku jabay tobannaan sano oo colaado ah wuxuu leeyahay baahiyo aad u badan. Dhammaantood si degdeg ah looma wada qaabili karo, gaar ahaan inta colaaddu sii socoto. Laakin waxaan la yaaban ahay haddii aynaan wadajir ahaan u gaari kari wayney guul deg deg ah oo ah dib-u-dhiska qarankii Soomaaliya ee burburay.

Ka asxaabta iyo jaalalka Soomaaliya ahaan, waxaan u baahan nahay inaan sii wadno socodka. Hadda ma aha waqtigii la meermeeri lahaa. Waa inaan u diyaargarownaa dib-u-dhacyo, laakiin aan dhabar adaygno. Kaddib ku dhowaad rubuc-qarni dagaallo, burbur dowladeed iyo dhibaatooyin baaxad leh oo bini'aadminnimo ah, Soomaalidu waxa ay go'aansatay inay dhisato nabad waarta. Waxayna u baahan yihiin oo ay naga mudan yihiin taageero joogta ah.

Aad baan idiinku mahad celinayaa